

# **Waxa Aan Sameyno**

Guddiga Xiriirka Shaqaallaha Qaranka waa wakaalad fadaraal madax bannaan oo awood u leh inay ilaalso xuquuqaha shaqaalaha si ay u abaabulaan oo au u go'aamiyaan haddii ay yeelanayaan ururro wakiilkooda gorgortanka. Wakaaladu waxaa kale oo ay wax ka qabataa sidii ay uga hortagi lahayd una xallin lahayd dhaqamada shaqo ee cadaalad darrada ah ee ay ku kacayaan shaqo bixiyeyasha iyo ururada gaarka ah.

---

## **Doorashooyin Qabo**

Haddii aad rabto in aad samaysato mise ku biirto urur, mise caddeyso urur jira, waxaad xarayn kartaa [codsi doorasho](#). Fadlan la xiriir sarkaalka macluumaadka jooga [Xafiiska Gobolka](#) kuugu dhow si laguu caawiyo.

## **Baar Eedeymaha**

Haddii aad aaminsantahay in xuquuqahaaga NLRA lagu xadgudbay, waxaad dacwad ka gudbin kartaa shaqo bixiye mise urur shaqaale. Waxaad foomka dacwadda ka heli kartaa [halkan](#). Fadlan la xiriir sarkaalka macluumaadka jooga [Xafiiska Gobolka](#) kuugu dhow si laguu caawiyo.

## **Fududee heshiisyo**

NLRB waxay ku dhiirrigalisaan dhinacyada inay ku xalliyan kiisaska xallinta halkii ay ka ahaan lahaayeen dacwad mar kasta oo ay suurtagal tahay. Xaqiqidii, in kabaden 90% kiisaska ku dhaqanka shaqada ee cadaalad darrada ah waxaa lagu xalliyaa heshiis mar kamid ah hannaanka, ha ahaato heshiis guddi mise heshiis gaar ah. Guddiga Is afgaradla Heshiiska

## **Go'aanso Kiis**

Marka cabashooyinka Hab dhaqannada Shaqada ee aan Cadaaladda ahayn ee ay soo saaraan agasimayaasha gobolka aanay horseedin xal, waxay caadiyan horseeddaa dhagaysi Garsoorka Sharciga Maamulka NLRB hortiisa ah. Sida dacwad kasta oo maxkamadeed, labada dhinacba waxay diyaariyaan doodo waxayna soo bandhigaan caddayn, markhaatiyo, iyo khabiiro.

## **Fuli Amarada**

Dibu eegista kiisaska, Maxkamadaha Wareega waxay qiimeeyaan aasaaska dhabta ah iyo sharciga ee Amarka Guddiga waxayna go'aansadaan, warbixin kooban mise dood hadal kadib, in la galo amar garsoor oo amraya u hoggaansanaanta Amarka. Maxkamaddu waxay kaloo ay galii kartaa amar iyadoo ay sabab u tahay in dhinacii ka warcelinaya uu ku fashilmay inuu ka soo horjeesto mise aanu lahayn wax sharci ah oo uu kaga horyimaado tallaabada Guddiga.